# Wararka Cusub ee Casriyeynta Jefferson Xaggaaga 2025



## Qorshaha Dugsiga Cusub

Dugsiga Sarre ee Jefferson wuxuu noqon doonaa dhismo dabaqyo badan leh oo koronto ku shaqeynaya oo dhinaca waqooyi  uu dhismuhu  ka xigo jidka Killingsworth. Dhismaha cusub waxaa ku jiri doona akedemiya farshaxan ee gobolka iyo dhismayaal taageeraya, oo ay ka mid yihiin goobo waxbarasho gaar ah oo loogu talogalay barnaamijyada Waxbarashada Farsamada Xirfadaha ee Jefferson (CTE). Garoonka orodadda waxaa la rari doonaa iyada oo isbedel lagu sameyn doono ay ka mid yihiin hagoog cusub, iyo iyada oo sidoo kale ay jiri doonto caweys cusub oo la dhigi doono garoonka baysboolka iyo goob ay ciyaartoygu ku sugnaadaan. Waxyaabaha kale ee muhiimka ah waxaa ku jira tiyaatarka cusub ee Jefferson, istuudiyaha qoob ka ciyaarka, goob dhexe oo ay ardaydu ku kulmaan, iyo meelo si gaar ah loogu talogalay  hay'adaha bulshada deegaanka iyo xarun cusub oo loo hibeeyey dhallinyarada yaraanta waalidka ku noqotay.

## Waxyaabaha Cusub Xaggaaga 2025

Iyada oo la raacayo jiheynta golaha guddida waxbarashda PPS si loo yareeyo kharashaadka casriyeynta dugsiga, kooxda mashruucu waxay soo saareen naqshad la cusbooneysiiyey oo ilaalineysa goobaha waxbarashada, ciyaaraha fudud, iyo goob loogu talogalay manhaj dheeraad ah oo ka baxsan dhammaan dugsiyada sarre ee PPS ee la cusbooneysiiyey. Kharashka oo hoos loo dhigo ayaa keentay qaab dhismeed la hagaajiyey oo kordhiyey barnaamijka sagxadda dhulka oo fududeeyey qaab dhismeedka iyo kuleylinta/nidaamka qaboojiyaasha. Kooxda mashruuca Jefferson waxay si hagar la'aan ah u shaqeeyeen si ay u xaqiijiyaan kaydinta iyagoo ilaalinaya sifooyinka naqshado badan oo ay mudnaanta siiyeen bulshada dugsiga Jefferson, iyada oo loo marayo shaqo ka qeybqaadasho dadweyne oo ballaaran.

**Dhismuhu wuxuu bilaabmayaa sanadka 2026**

**Booqo shabakada haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah**

Shabakada Casriyeynta ee Jefferson **www.pps.net/JeffersonBond** ayaa kula socodsiin doonta horumarka ugu dambeeyey oo waxay ku siin doonaan liiska fursadaha hawlgalinta ee soo socda.

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS